


Sidee loo codeeyaa


Waxaa jira saddex hab oo kala duwan oo loo codeeyo:



Shaqsi ahaan: Waxa ciwaankaaga laguugu soo diri doonaa kaadhka codaynta, kaas oo kuu sheegi doona halka ay ku taalo goobta codbixinta ee degmadaada. Waxaad u baahan doontaa inaad soo qaadato hal foom oo asal oo sawirka aqoonsiga la aqbalay oo asal ah si aad uga codeeyso xarunta codbixinta



Boosto ahaan: Haddi aadan awoodin inaad si shaqsiya u codeeyso, waxaad codsan kartaa codeynta boostada. Uma baahnid inaad keento sawirka aqoonsiga si aad uga codeeyso boostada. Waxa jira hab kale oo aqoonsi-hubin ah, sida xaqiijinta saxiixaaga iyo taariikhda dhalashada.




Wakiil ahaan: Haddii aadan si shaqsi ah u codeyn karin, tusaale ahaan sababo caafimaad darteed, waxaad magacaaban kartaa qof ku codeeya magacaada. Waxaad u baahanaysaa inaad buuxiso foom una dirto Xafiiska Diiwaangelinta Doorashada degmadaada. Wakiilkaagu waa inuu soo qaato sawirka aqoonsigiisa si uu ugu codeeyo magacaada.

CODEYN LA'AANI, WAA COD LA'AAN

Diwaangalinta codbixiyaha iyo Aqoonsiga Codbixiyaha

Xeerka Doorashooyinka (2022)
[Elections Act, (2022)] waxa uu wax ka badelay habka aan u codeyneyno. Haddii aad tahay reer London, hadda waxaad u baahantahay inaad tusto foom la aqbalay oo sawir aqoonsi ah si aad si shaqsiya u codeeyso.

Booqo GLA Democracy Hub
<https://registertovote.london/>



GREATER
LONDON
AUTHORITY

#NO
VOTE
NOVOICE

SOUK
SHOUT OUT UK



Supported by the Greater London Authority, City Hall, Kamal Chunchie Way, London, E16 1ZE. Printed and promoted by Shout Out UK, 240 Portobello Road, London, W11 1LL.